

Ka bilaabida Dugsiga ee Maraykanka:

Buuga-tilmaamaha oo loogu talagalay Qoysaska Ardayda Cusub



Macmuulaadkan dhanka muuqaalka ah waxaa la diyaariyay iyada oo la raacayo Heshiiska ED-IES-17-C-0009 ee Shaybaarka Waxbarashada Gobolka ee Northwest, oo ay maamusho Waxbarashada Northwest. Waxyaabaha ku jira daabacaadani kama turjumayaan aragtida rasmiga ah ama siyaasadaha IES ama Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, mana tilmaamayaan magacyo ganacsi, alaabooyinka ganacsiga, ama ururo kuwaasi oo muujinaya taageerada Dowladda Maraykanka.

Barashada Nidaamka Dugsiga ee Maraykanka

Waxbarashada dadweynuhu waa mid lacag la'aan ah.

Carruurta oo dhan waa in ay dugsiga aadaan, sida caadiga ah laga bilaabo da'da 5 ilaa 18. Iyada oo ku xiran gobolka, da'da ugu badan way kala duwan tahay (inta badan, waa 20).

Marka ilmahaagu ka maqnaado dugsiga, waa in aad la soo socodsiiisa xafiiska imaanshaha dugsiga ama shaqaalaha xafiiska hore.

Caadi ahaan sanad dugsiyeedku wuxuu bilaabmaa Ogoosto ama Sibtambar wuxuuna dhammaadaa Maajo ama Juun.

Carruurta badankoodu waxay fasallada dhigtaan qiyaastii lix saacadood maalintii, Isniinta ilaa Jicmaha.

Ardayda u baahan in ay soo gaaraan/la qabsadaan waxbarashoodu waxay dhigan karaan dugsiga xagaaga ee Juun iyo Luulyo.

Barashada Ingiriisiga: Dugsiyada waxay siyaabo kala duwan Ingiriisiga u baraan ardayda cusub. Kuwo badan ayaa bixiya fasallo gaar ah. Kuwo kale ayaa bixiya macallin gaar ah fasalka gudihisa. Ilmahaagu waxay ahayd in uu lahaado macallin si gaar ah loo tababaray si uu Ingiriisiga u baro ardayda cusub. Weydii dugsigaaga sida iyo cidda uu ilmahaagu ka baran doono Ingiriisiga.

- Dugsiyada qaarkood ayaa ardayda baranaysa Ingiriisiga koox ahaan iskugu keena iyada oo ilmahaaga laga saao fasalka ama uu yeesho macallin khaas ah oo ku soo biira fasalka.
- Dugsiyada qaarkood ayaa yeelan doona laba macallin fasalka dhexdiisa ama yeelan doona hal macallin oo bara Ingiriisiga ama maaddooyinka kale.
- Dugsiyada qaarkood ayaa bixiya fasallo luqaddo laba ah ama laba luqaddood lagaga hadlo kaasi oo ilmahaagu barto sida wax loo akhriyo, qoro, hadlo, iyo fahamka Ingiriisiga iyo luqad kale—badanaa luqaddaada guriga—isku hal waqti.

Bilaabida Hawsha | Diiwaangelinta



Diiwaangelintu waa sida ardayda cusub loo qoro dugsiyada Maraykanka. Diiwaangelintu waxay ka dhici kartaa dugsiga ama xafiiska degmada, waxaana sida caadiga ku jira soo dhaweynta ardayda iyo qoysaskooda, ururinta iyo wadaagida macluumaadka, iyo jiheynta ardayda iyo qoysaskooda ee dugsiga.

Inta lagu jiro diiwaangelinta, dugsiga ayaa ururiya macluumaad muhiim ah oo ku saabsan ilmahaaga, oo ay ku jiraan magacooda, taariikhdooda dhalasho, waxbarashadoodii hore, caddeynta deganaanshaha, iyo tallaalada. Waxaa sidoo kale lagaa codsan doonaa in aad buuxiso ra'iyi ururinta luqadda guriga lagaga hadlo. Macluumaadkan oo dhan waa kuwo gaar ah oo qofna lalama wadaagi karo meel ka baxsan dugsiga iyada oo aanay jirin ammar maxkamaddeed ama oggolaanshaagu.^{1,2}

Magacyada

Waa muhiim in la xaqiijiyo in magacaaga iyo ka ilmahaaguba ay sax yihiin foomamka diiwaangelinta korkooda. Si taxaddar leh u hubi magac kasta oo ka codso xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga in uu kuu qoro xarafka kasta oo magacu ka kooban yahay. Waxaad sidoo kale u sheegi kartaa waxa uu yahay magaca ilmuhu doorbidayo in loogu waco.³

Waxbarashada hore

Dugsigu wuxuu kaa codsan doonaa in aad la wadaagto diiwaannada waxbarasho ee ilmaha ama qoraalada dugsiga. Macluumaadkani wuxuu gacan ka geysan doonaa xaqiijinta in ilmahaaga lagu meeleeeyo heerka fasal ee saxda ah isla markaana aanu ku soo celin koorsooyinka. Haddii aadan haysan macluumaadkani, weydiiso

caawimaad. Haddii ilmahaagu in muddo ah uusan dhigan dugsi, la socodsii dugsigiisa cusub si uu u heli karo taageerada uu u baahan yahay si uu u guuleysto.^{4,5}

Caddeynta deganaansaha

Dugsigu wuxuu codsan doonaa dokumenti (sida biilasha adeegyada ama ijaarka) oo caddeynaya in ilmahaagu ku nool yahay degmada. **Dugsigu ma aha in uu codsado caddeynta muwaadinimada ama nooc kasta oo ah dokumentiga muhaajirnimada.** Dugsiyada qaarkood waxay codsan karaan lambarka social security-ga, laakiin ma diidi karaan isqoritaanka haddii adiga ama ilmahaagu aadan haysan mid ama doorato in aadan bixinin.^{6,7}

Tallaalada

Marka ardaydu aysan haysan dokumentiyada tallaalada ee loo baahan yahay, dugsiga ayaa kala shaqeyn kara qoxootiga ama hay'adaha dowladda in la helo diiwaannada iyaga oo gacan ka geysta xaqijinta in ay buuxinayaan shuruudaha gobolka.⁸

Ra'iyi ururinta luqadda guriga lagaga hadlo

Dugsiyada ayaa kaa codsan doona in aad buuxiso ra'iyi ururinta luqadda guriga laga hadlo, taasi oo ku weydiinaysa waxa ay yihiin luqaddaha lagaga hadlo gurigaaga. Haddii uu ilmahaagu ku hadlo ama loo soo bandhigo luqad aan ka ahayn Ingiriisi, imtixaan tijaabo ah ayaa laga qaadi doonaa si loo go'aamiyo kartidiisa luqadda Ingiriisiga. Ra'iyi ururinta luqadda guriga lagaga hadlo way kala duwan tahay gobol iyo degmo ahaan, waxayna dugsiyada ka caawisaa in la aqoonsado ardayda ay dhici karto in ay u qalmaan taageerada luqadda la xiriirta. Waa muhiim in si sax ah looga jawaabo ra'iyi ururinta si ilmahaagu u helo taageerada uu u baahan yahay.⁹



Ka qayb qaadashada | Wax u doodista

Marka la joogo Maraykanka, qoysaska waxay haystaan fursado badan oo ay uga lug yeeshaan waxbarashada ilmahooda, taasi oo ka caawin karta wanaajinta imaanshaha dugsiga iyo guusha tacliimeed.¹⁰ Intaasi waxaa dheer, marka qoys wax ka ogaado dugsiga ilmahooda, macallinkooda, iyo koorsadooda (ooyinkooda), waxay si fiican diyaar ugu yihiin in ay ilmahooda ka caawiyaan wax ka qabashada caqabadaha jira. Si kale u dhig, waalidiinta/mas'uuliyiinta la wargeliyay waa u doodayaasha ugu fiican carruurtooda.¹¹

Hal hab oo muhiim ah oo loogu lug yeesho waxbarashada ilmahaagu waa in laga soo qayb galo kulamada waalidka-macallinka. Kulamadani waxaa sida caadiga ah isku soo habeeya dugsiga hal ama laba jeer sanadkii waxayna ku siiyaan fursad aad macallinka(iinta) ugala hadasho horumarka ilmahaaga. Si kastaba ha ahaatee, waxaad markasta la kulmi kartaa macalliinka(iinta) ilmahaaga markasta oo aad hayso su'aalo ama walaac qabto—adiga oo markasta xaq u leh in aad yeelato turjubaan.¹²



Halkan waxaa ku qoran siyaabo kale oo loogu lug yeesho waxbarashada ilmahaaga.¹³

- Ka soo qayb gal tababarka si aad wax uga ogaato waayo-aragnimada ilmahaaga ee dugsiga
- Dhageyso ilmahaaga in uu ka hadlo dugsiga oo weydii su'aalo
- Ilmahaaga ka caawi shaqada guriga
- Korka kala soco safar aqoon kororsi
- Ka qayb qal dhacdooyinka dugsiga (sida habeenka qoyska)
- Tabaruc ahaan uga shaqee dugsiga ilmahaaga
- Ka caawi hawsha manhajka dheeraadka ah ama kooxda ciyaaraha ee dugsiga
- U fidi in aad soo bandhigid ku saabsan dalkaaga hooyo siiso fasalka ilmahaaga
- Ku biir Ururka Waalidka Macallinka (PTA) ama ka qayb gal kulamada guddiga dugsiga





Wax Helitaanka | Adeegyada

Marka la joogo Maraykanka, ilme kastaa wuxuu leeyahay xuquuqda waxbarashada dadweynaha ee K-12 oo lacag la'aan ah—iyada oo aan la eegayn jinsiyadda, dhalashada, lab ama dhedig, diinta, luqadda, ama xaaladda muhaajirnimo.¹⁴ Ardayda iyo qoysaskooda oo dhani waxay sidoo kale leeyihiin xuquuqaha soo socda:

Xuquuqda loo leeyahay horumarinta luqadda Ingiriisiga iyo maadadda heerka-fasal

Ardayda baranaysa Ingiriisigu waxay u baahan yihiin in ay heli karaan manhaj la mid ah kuwa ay helayaan ardayda aan baranayn Ingiriisiga ee ay isku faca yihiin, taasi oo macnaheedu yahay in ay dugsiyadu meesha ka saaraan wixii caqabado dhanka luqadda ah ee la xiriira barashada. Haddii si kale hadalka loo dhigo, ardayda baranaysa Ingiriisiga waa in loo dhigaa xisaab, cilmiga bulshada iyo saynis la mid ah ta ay ardayda aan baranayn Ingiriisiga kaasi uu ah hab awood u siiya in ay bartaan (tusaale, iyada oo ku qoran luqaddooda ay guriga kaga hadlaan ama macallin loo diyaariyay in uu waxbaro Ardayda baranaysa Ingiriisiga).^{15,16}

Adeegyada fasiraadda/turjumaada

Waalid ama daryeel bixiye ahaan, waxaad heli kartaa adeegyada turjumaad iyo fasiraadda kulan kasta oo lala leeyahay macallimiinta. Intaasi waxaad dheer, dugsiyada dadweynuhu waxay taageero luqaddeed siiyaan qoysaska codsada iyaga, iyada oo barnaamijyada dugsiga, adeegyada, waxyaabaha kala duwan, iyo hawlaha ay tahay in la iskugula xiriiro luqaddo badan.¹⁷

Adeegyada dugsiga iyo barnaamijyada waxbarasho

Ilmahaagu wuxuu ka qayb qaadan karaa dhammaan barnaamijyada waxbarasho ee federaalku dhaqaalihisa bixiyo iyo adeegyada dugsiga ee uu u qalmo. Kuwaasi waxaa ka mid ah waxbarashada gaarka ah, cuntooyin lacag la'aan ah ama qiimaheeda hoos loo dhigay, adeegyada bartaha Ingiriisiga, barnaamijyada taageera carruurta guri la'aantu hayso iyo carruurta shaqaalaha muhaajiriinta ah, koorsooyinka horumarsan (sida, isa sharfidda, Mee-laynta Horumarsan, Shahaadada Caalamiga ah), barnaamijyada ardayda xirfadda iyo hibada leh, iyo barnaamijyada carruurnimada hore ee pre-kinder-garten (sida Head Start). Xaaladda muhaajirnimo saameyn kuma yeelanayso u qalmida barnaamijyadani federaalku dhaqaalihisa bixiyo.¹⁸

Haddii ilmahaaga loo aqoonsado in uu yahay bartaha Ingiriisiga iyada oo ku saleysan ra'iyi ururinta luqadda guriga lagaga hadlo (fiiri qaybta “Bilaabida Hawsha”), dugsigiisu waa in uu kugu wargeliyaa waxyaabaha soo socda 30 maalmood guhadood ah laga bilaabo bilowga sanad dugsiiyeedka:

- **Heerka aqoon Ingiriisiga ee ilmahaaga**
- **Barnaamijyada iyo adeegyada la heli karo si loo buuxiyo baahiyaha waxbarasho ee ilmahaaga**
- **Xuquuqdaada aad u dooranayso in ilmahaagu aanu ka qayb qaadan barnaamijyadani iyo adeegyadani**



Helitaanka Macluumaad Dheeraad ah | Ilaha

Marka aad wax badan ka ogaato nidaamka waxbarasho ee Maraykanka, ilaha soo socda waxa dhici karta in noqdaan kuwo wax tar leh:

Ku soo dhowow Maraykanka: Buuga tilmaamaha oo loogu talagalay qoxootiga |

<https://bit.ly/3d8zFcy>

Waxaa dejiyay Xarunta Ilaha Hanuuninta Dhaqanka,¹⁹ ilahani (oo ay ku jirto DVD) ayaa la helayaa iyaga oo ku qoran 10 luqaddood. Waxay kaa caawin doontaa inaad u diyaar garowdo dhowrka bilood ee kuugu horreeya Maraykanka. Tusaale, waxay kuu sheegaysaa wax aad filayso, marka aad hesho meel aad ku noolaato, in aad raadsado shaqo, iyo la qabsiga dhaqanka iyo bulshada Maraykanka.

Buuga-tilmaamaha Waalidka oo loogu talagalay Bartayaasha Ingiriisiga |

<https://bit.ly/2UMCJ7Y>

Waxaa dejisay Waxbarashada Northwest,²⁰ ilahani waxay sharraxayaan sida ardayda loo aqoonsado bartayaasha Ingiriisiga ahaan, loogu dhigo Ingiriisiga iyo maaddooyinka kale, isla markaana la iskugu doorto in aqoon loo leeyahay waxbarashada Ingiriisiga oo looga wareego adeegyada bartaha Ingiriisiga. Tilmaamaha waxaa la helayaa iyada oo ku qoran Ingiriisi iyo Isbaanish.

Fiidiyowga Tababarka Waalidka: Barnaamijyada bartaha luqadda Ingiriisiga (ELL) ee Gobolka New York |

<https://bit.ly/2MYoDw3>

Waxaa dejisay Waaxda Waxbarashada ee Gobolka New York,²¹ kani waa fiidiyow 12 daqiiqo ah (oo la helayo isaga oo ka kooban luqaddo badan) wuxuu sharraxayaa aqoonsiga bartaha Ingiriisiga iyo nidaamka qiimeynta. Intaasi waxaa dheer, wuxuu si faahfaahsan u tilmaamayaa kala doorashada barnaamijyada bartaha Ingiriisiga. Iskasta oo ay ku jiraan macluumaad u gaar ah New York, hadana fiidiyowgu wuxuu sidoo kale bixinayaa hordhac wanaagsan oo ku saabsan dugsiyada ku yaala Maraykanka.

Midka Saxda ee Ku habboon: Xulashada Barnaamijka Barashada Ingiriisiga oo loogu talagalay Ardaydaada |

<https://bit.ly/2UHCc7l>

Waxaa dejiyay Shaybaarka Waxbarashada Gobolka ee Northwest,²² buugan-tilmaamuhu wuxuu sharraxayaa barnaamijyada barashada Ingiriisiga, noocyada bartayaasha Ingiriisiga, su'aalaha la isweydiiyo marka la dooranayo barnaamij, iyo noocyada inta badan laga isticmaalo Oregon. Waa mid inta badan ku aadan maamulayaasha dugsiyada iyo degmada, laakiin waxaa ku jira macluumaad waxtar u yeelan kara qoysaska.



Dhammaan tixraacyadu waxay ku qoran yihiin Ingiriisi

- ¹ U.S. Department of Education. (2020). *Protecting Student Privacy: FERPA Regulations*. Washington, DC: Author. Retrieved March 11, 2020, from <https://studentprivacy.ed.gov/node/548/>
- ² U.S. Department of Justice and U.S. Department of Education (2015). Schools' Civil Rights Obligations to English Learner Students and Limited English Proficient Parents. Washington, DC: Author. Retrieved April 6, 2020, from <https://www2.ed.gov/about/offices/list/ocr/ellresources.html>
- ³ Greenberg Motamedi, J., Jaffery, Z., Hagen, A., & Yoon, S. Y. (2017). *Getting it right: Reference guides for registering students with non-English names* (2nd ed.) (REL 2016-158 v2). Washington, DC: U.S. Department of Education, Institute of Education Sciences, National Center for Education Evaluation and Regional Assistance, Regional Educational Laboratory Northwest. <https://eric.ed.gov/?id=ED572938>
- ⁴ Martinez-Wenzl, M. (2018). *Finding the right starting point: Three steps for evaluating international transcripts* [Infographic]. U.S. Department of Education, Institute of Education Sciences, National Center for Education Evaluation and Regional Assistance, Regional Educational Laboratory Northwest. Retrieved March 6, 2020, from https://ies.ed.gov/ncee/edlabs/infographics/pdf/REL_NW_Finding_the_Right_Starting_Point_Obtaining,_Interpreting_and_Evaluating_International_Transcripts.pdf
- ⁵ Boyson, B. A., & Short, D. (2003). *Secondary school newcomer programs in the United States* (Research Report No. 12). Santa Cruz, CA: University of California, Santa Cruz, Center for Research on Education, Diversity & Excellence.
- ⁶ U.S. Department of Education. (2014). *Educational Services for Immigrant Children and Those Recently Arrived to the United States*. Washington, DC: Author. Retrieved March 11, 2020, from <https://www2.ed.gov/policy/rights/guid/unaccompanied-children.html>
- ⁷ U.S. Department of Justice and U.S. Department of Education (2015). Information for Limited English Proficient (LEP) Parents and Guardians and for Schools and School Districts that Communicate with Them. Washington, DC: Author. Retrieved April 6, 2020, from <https://www2.ed.gov/about/offices/list/ocr/docs/dcl-factsheet-lep-parents-201501.pdf>
- ⁸ U.S. Department of Education. (2014). *Educational Services for Immigrant Children and Those Recently Arrived to the United States*. Washington, DC: Author. Retrieved March 11, 2020, from <https://www2.ed.gov/policy/rights/guid/unaccompanied-children.html>
- ⁹ Every Student Succeeds Act of 2015. (2015). Pub. L. No. 114–95, § 114, Stat. 1177.
- ¹⁰ Antony-Newman, M. (2019). Parental involvement of immigrant parents: A meta-synthesis. *Educational Review*, 71(3), 362–381. <https://eric.ed.gov/?id=EJ1216533>
- ¹¹ New York State Education Department. (n.d.). *Parent orientation video: English language learner (ELL) programs in New York State*. Retrieved May 27, 2020, from <http://www.nysed.gov/bilingual-ed/parent-orientation-video-english-language-learner-ell-programs-new-york-state>
- ¹² Ibid.
- ¹³ Cultural Orientation Resource Center. (2012). *Welcome to the United States: A guidebook for refugees*. Washington, DC: Cultural Orientation Resource Center, Center for Applied Linguistics. Retrieved March 5, 2020, from http://coresourceexchange.org/wp-content/uploads/2019/09/2012-English-Welcome_Guide.pdf
- ¹⁴ Nelson, L. (2017). *Know your rights: Your school has no business checking your immigration status*. San Francisco, CA: ACLU of Northern California. Retrieved May 27, 2020, from <https://www.aclunc.org/blog/know-your-rights-your-school-has-no-business-checking-your-immigration-status>
- ¹⁵ Douglas, W. O., & Supreme Court of the United States. (1973) U.S. Reports: *Lau v. Nichols*, 414 U.S. 563 . [Periodical]. Retrieved May 27, 2020, from <https://www.loc.gov/item/usrep414563/>
- ¹⁶ Equal Educational Opportunities Act of 1974. (1974). Pub. L. No. 93–380, Title II, § 202, 88 Stat. 514.
- ¹⁷ U.S. Department of Justice and U.S. Department of Education (2015). *Dear Colleague Letter*. Washington, DC: Author. Retrieved April 6, 2020, from <https://www2.ed.gov/about/offices/list/ocr/letters/colleague-el-201501.pdf>
- ¹⁸ U.S. Department of Agriculture. (2017). *Eligibility Manual for School Meals Determining and Verifying Eligibility*. United States Department of Agriculture Food and Nutrition Services Child Nutrition Programs. Retrieved May 7, 2020, from https://fns-prod.azureedge.net/sites/default/files/cn/SP36_CACFP15_SFSP11-2017a1.pdf
- ¹⁹ Cultural Orientation Resource Center. (2012). *Welcome to the United States: A guidebook for refugees*. Washington, DC: Cultural Orientation Resource Center, Center for Applied Linguistics. Retrieved March 5, 2020, from http://coresourceexchange.org/wp-content/uploads/2019/09/2012-English-Welcome_Guide.pdf
- ²⁰ Education Northwest. (n.d.) *Parent guide for English learners*. Portland, OR: Author. Retrieved May 27, 2020, from <https://educationnorthwest.org/resources/parent-guide-english-learners-english-and-spanish-versions>
- ²¹ New York State Education Department. (n.d.). *Parent orientation video: English language learner (ELL) programs in New York State*. Retrieved May 27, 2020, from <http://www.nysed.gov/bilingual-ed/parent-orientation-video-english-language-learner-ell-programs-new-york-state>
- ²² Blackburn, T. (n.d.). *The right fit: Selecting an English learning program for your students* [Infographic]. U.S. Department of Education, Institute of Education Sciences, National Center for Education Evaluation and Regional Assistance, Regional Educational Laboratory Northwest. Retrieved May 27, 2020, from <https://ies.ed.gov/ncee/edlabs/regions/northwest/pdf/relnw-072518.pdf>